

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA

الرسمية

OFFICIAL



RASMIGA AH

الجريدة

BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 8aad

FAAFIN SANADLE

Muqdisho

2020

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2020

Qiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

SANADKA

2020

ANSIXINTA CAHDIGA KA MID NOQOSHADA HAY'ADDA DAMAANADDA MAALGASHIGA DARAFYADA BADAN

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Lr. GSH237/12/20 Taariikh 06/01/2020 kuna saabsan ansixinta Cahdiga ka mid noqoshada Hay'adda Damaanadda Maalgashiga Darafyada badan

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Cahdigaan

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray:


Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday ansixinta Cahdiga ka mid noqoshada Hay'adda Damaanadda Maalgashiga Darafyada badan.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

MUQDISHO: 15/02/2020



Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)